



Fayraska Jamestown Canyon (JCV, Jamestown Canyon Virus)

Xaashida xaqiiqada



Fayraska Jamestown Canyon (JCV) waa jirro laga qaado qaniinyada kaneecada cudurka qabta.



Qof kasta ayaa qaadi kara fayraska JCV, balse dadka wakhtiga ku qaata guriga bannaankiisa ayaa halis sarreysa ugu jira. Fayraska JCV sidoo kale wuxuu ku dhici karaa deerada.

Astaamaha iyo Calaamadaha



Qandho ama Qarqaryo



Daciifnimo



Daal aad u badan



Maskaxda oo Bararta



Jahawareer



Madax-xanuun

Calaamadaha iyo astaamaha caamka ah ee kiisaska la aqoonsaday waxaa ka mid ah qandho iyo jirro u eg kuwa hargabka. Fayraska JCV wuxuu horseedi karaa barar maskaxeed, kaasoo keena jirro aad u daran. Qiyaastii kala-bar dadka qaba fayraska JCV ayaa isbitaalka la dhigaa.

Lama garanayo inta ay qaadan karaan calaamadaha iyo astaamaha inay ku baxaan kadib marka ay dhacdo qaniinyada kaneecada cudurka qabta.



La hadal dhakhtarkaaga haddii aad yeelato mid ka mid ah calaamadahan ama astaamahan. Dhakhtarkaagu waxaa laga yaabaa inuu dhiig kaa qaado ama dareere lafdhabar si uu u baaro fayraska JCV. Ma jirto daaweyn gaar ah oo loogu talagalay fayraska JCV oo jirrada daran ayaa u baahan karta taageero daaweyn oo lagu dhex qaato isbitaalka.

Kahortagga Fayraska Jamestown Canyon

Sida ugu fiican ee looga hortagi karo fayraska JCV waa inaad iska ilaalisaan adiga iyo qoyskaaga inay kaneeco idin qaniinto.



Isticmaal sunta cayayaanka kahortagta ee ay EPA ansixiyeen ee maqaarka/jirka loogu talagalay sida:

- Sunta DEET
- Saliida Lemon Eucalyptus
- IR 3535
- Sunta Picaridin



Xiro shaar gacmo-dheer ah iyo surwaal lugo dheer markaad bannaanka joogto



Isticmaal kareemka iyo sunta cayayaanka ee dharka ee permethrin



Ka takhalus goobaha ay kaneecadu ugxanta ku dhali karto adigoo qallajinaya biyaha fadhiya ee ku jira bannaanka guriga

Biyaha fadhiya waa in la qallajiyo/miir/nuugo ugu yaraan hal mar toddobaadkii. Kuwani waxaa ku jira baaldiyada, baaquliyada rabaayadaha, iyo baafafka shimbiraha. Sidoo kale waxaad dalooloo u yeeli kartaa waxyaabaha ay ka midka yihiin taayarada/sheeggaga iyo baaldiyada bannaanka looga tagay oo ay biyuhu fadhiistaan. Kahortagga dheeraadka ah waxaa ka mid ah iska ilaalinta imaanshaha bannaanka waaberiga iyo maqribka marka kaneecada ugu badani ay jirto iyo hagaajinta daloolada ku yaala albaabbada iyo muraayadaha daaqadaha.

Wixii xog dheeraad ah, Booqo:



1. www.maine.gov/dhhs/mosquitofaq (Si aad uga hesho su'aalaha inta badan la isweydiiyo ee kaneecada)

2. www.epa.gov/insect-repelents/find-repelent-right-you (Si aad u ogaato sunta celisa cayayaanka ee ay EPA ansixiyeen)

3. <https://www.ncbi.nlm.nih.gov/pmc/articles/PMC4530766/> (Maqaalka Jariidadeed ee Cudurka Fayraska Jamestown Canyon ee ka jira Maraykanka)

Waxaad sidoo kale ka wici kartaa Maine CDC nambarka 1-800-821-5821.